



Tilmaanta Dib uwarshadaynta

Recycling Guide

Waraaqda

- Waraaqaha boostada, xafiiska iyo dugsiga
- Wargaysyada iyo jaantuska buugta
- Wargaysyada iyo filimaanta
- Buuggaagta taleefanka

Sanduuqyada:

- Qaanada
- Sanduuqyada badarka iyo buskudka
- Sanduuqyada kabaha, sanduuqyada hadiyadaha iyo sanduuqyada qalabka elektarooniga ah
- Sanduuqyada daawada cadayga, daawooyinka lacuno iyo sanduuqyada kale ee musqusha



Kaartoonada

- Kaartoonada caanaha
- Sanduuqyada cabbitaanka
- Kaartoonada saabuunta, maraqa iyo qamriga



Dhalooyinka

- Garjeelada iyo dhalooyinka cuntada iyo cabitaanada



Caagaga

Dhalooyinka iyo sakeelada:

- Dhalooyinka biyaha, soodhada iyo cabitaanka
- Sakeelada caanaha iyo cabitaanka
- Dhalooyinka shiishiida iyo iskudarka saladhka
- Dhalooyinka daawada weelasha lagu dhaqo iyo sakeelada daawooyinka nadiifinta
- Dhalooyinka shaanbada, saabuunta iyo kareenada jirka



Koobabka iyo qasacadaha:

- Koobabka yoogadka, khudaarta iyo miraha
- Koobabka iyo baaquliyaaasha la iska arko ee laburburin karo
- Qasacadaha Margarine, jiiska, iyo qasacadaha kale
- Soosaarista qasacadaha iyo cuntada diyaarsan

Baakadaha:

- Baakadaha nadiifka ah, ee aan jeexjeexmin oo lagu keeno boonbalayaasha iyo elektarooniyada

Birta

- Qasacadaha cuntada iyo cabitaanada



Lama aqbalaayo: bacaha, fiilada cajalada, iyo duubabka • foomamka caaga ah (Styrofoam™) • wasakhda cuntada • koobabka iyo saxanada caaga ah • saxanada qalinka ah, galaasyada cabitaanka, dhalooyinka daaqada, iyo aashuunada ceramics qashinka ceramics qasacadaha ay kujiraan maadooyinka halista ah

Dib uwarshadaynta wasakhda

Recycling beyond the cart

Kudeeq, keen oo dib uwarshadee waxbadan

Macquul maaha in waxkasta si dagan dib loogu warshadayn karo gurigga. Inkastoo ay adagtahay in maadooyinka aan qashinka lagu darin, waa muhiim in aad dib u isticmaasho aad dib uwarshadayso waayo waxay qayb wayn kayihiin tubooyinkeena wasakhda qaada.

Kudeeq



Inaad dadka kale siiso waxyaabaha dib loo isticmaali karo ururada deeqaha bixiya ayaa ah qaab fiican ood kuyarayn karto wasakhda aadna bulshadada kucaawin karto. Tusaale ahaan, qofka caadiga ah ayaa tuuro 70 pound (31.75 Kiilogaraam) oo dhar ah iyo alaabaha kale sanad kasta. Waxaad kudeeqi karta dharka, boonbalayaasha, alaabta ciyaaraha, buugaagta, muusiga, iyo waxa ugu fiican. Karaadi fursadaha meelaha alaabaha loogu deeqo aagaaga adoo booqanaaya bogga hennepin.us/choosetoreuse.

Isticmaal xarumaha alaabta celiska ladhigo ee Degmada Hennepin



Degmada Hennepin waxay leedahay xarumo alaabaha la iska tuuro lakeeno halkaaso dadka deegaanku keenaan wasakhda elektorooniyada, alaabta korontada, wasakhda halista ah ee gurigga, iyo waxyaabo kale oo badan. Xarumuhu waxay furanyihiin sanadka oo dhan. Wixii macluumaad dheeri booqo hennepin.us/dropoffs.

Booqo maalinta wasakh gaynta ee magaaladaada



Inta badan magaaloooyinka ayaa qabta munaasabada wasakhda lagu aruursho ayadoo alaab badan oo aan dib loo warshadayn karin laga qaado dadka. Inkastoo alaabta la qaadi karo iyo qarashka lagaa qaadaayaa ay kuxirantahay magaalada aad joogto, alaabta goobaha inta badan laga aqbaloo munaasabadaha nadiifinta waxaa kamid ah alaabta korontada, batariyada, roogaga, alaabta dhismaha, qalabka gurigga, joodariyaasha, biraha qaraabka ah iyo taayarada. Wixii macluumaad dheeri ah waydii magaaladada.

Dib ugu warshadee tafaariiqleeyda kaqaybgalaysa munaasabada



Bacaha iyo cajaladaha filimaanta laguma aqbaloo barnaamijyada dib uwarshadaynta, laakin inta badan dukaanada iyo dadka tafaariiqda wax ku iibsha ee waawayn hadda way aqbalayaan dib uwarshadayntooda. Raadi birta wasakhda lagu rido ee udhaw albaabka hore ee dukaanka.

Hennepin County
Environment and Energy

hennepin.us/recycling
612-348-3777

34-701-01-17 Somali

